**XEERKA 12 Juun 1962, Lr. 16**
**Aasaasidda Wakaaladda Qaranka ee Ganacsiga Dibadda (E.N.C.E.)**

MADAXWAYNAHA JAMHUURIYADDA

Markuu arkay qoraalka oggolaashaha Golaha Shacabka

WUXUU MEELMARIYAY

Xeerka soo socda:

## Qod. 1
## Nooca iyo Xarunta

1. Waxaa la aasaasay Wakaaladda Qaranka ee Ganacsiga Dibadda (E.N.C.E)
2. E.N.C.E. waa Wakaala Dawladeed oo leh shaqsiyad qaanuuneed u gaara oo madax bannaan.
3. Xarunteeda dhexe waa Muqdisho, waxayna ku yeelan kartaa laamo iyo wakiillo Soomaalia iyo Dibadda.

## Qod. 2
## Hadafka

1. Hadafka Wakaaladdu waa:
   a) in ay u qabato hawlgallada dhoofinta iyo soo dejinta badeecadaha Dawladda, Wakaaladaha Dawladda ama hay'ado Dawladdu bah-wadaag la ah, sida ka faa'idaysiga iyo baabi'inta daymaha ama maalgelinta dibadeed;
   b) in ay alaab soo gadato ama iibiso dalka Jamhuuriyadda dhexdiisa, si waafaqsan ujeddda kor ku qoran;
   c) inay samayso hawlo kale oo dheerada
2. Hawlaha wakaaladda waa in ay si joogto ah ku jihaysnaadaan ulajeedooyin dana guud iyo in loo qabto tilmaamaha guud oo uu bixiyay Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga.

## Qod. 3
## Hantid

Hantida Wakaaladda waxay ka koobantahay taakula lacageed oo ah Sh Som.500.000 (shanboqolokun) oo ay Dawladdu bixisay , iyo maalgelin kale ee Dawlaadda iyo wakaalado dawladeed, sidoo kale lacago keyd ah ee faa'idada adeegga hawlaha laga helay.

## Qod. 4
## Xuquuqda dallaalka

Hawlgallada dhoofinta iyo soo dejinta ee ku xusan qod. 2, Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, marka uu dhageysto Golaha Wasiirada, wuxuu jidayn karaa xuquuq dallaal oo la siiyo Wakaaladda.

## Qod. 5
## Dayn qaadashada

Inta ay hawlaheeda ku guda jirto, Wakaaladdu waxay heshiis dayn la geli kartaa hay'adaha qaran ee maliyadeed iyo kuwa dibadda, marka uu oggolaado Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, lana dhagaysto talada Golaha Wasiirada.

**Qod. 6**
**Qaab-dhsmeedka**

1. Xubnaha Wakaaladdu waa:
   a) Golaha Maamulka, oo ka kooban, Guddoomiyaha Wakaaladda E.N.C.E. oo shir guddoomiya, Agaasimaha Guud iyo saddex la-taliye ee maamulka;
   b) Guddoomiyaha E.N.C.E.;
   c) Agaasimaha Guud;
   d) Guddiga Hantidhowrka, oo ka kooban Guddoomiyaha Guddiga iyo laba Hantidhowre;
2. Guddoomiyha E.N.C.E. iyo Agaasimaha Guud waxaa lagu magacaabayaa Dekereeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda marka Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga uu talo ku soo jeediyo, lana dhagaysto Golaha Wasiirrada.
   La-taliyeyaasha Maamulka, Guddoomiyaha Guddiga Hantidhowrka waxaa lagu magacaabayaa dekereeto Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga kadib marka uu dhagaysto Guddiga Ilaalinta.
3. Xilalka la soo sheegay waxay haynayaan muddo saddex sano, hasayeeshe waa loo cusboonaysiin karaa, xitaa haddii ay jiraan sababo culus ah waa la soo gaabin karaa muddada, qaababka iyo mas'uulinta lagu soo sheegay faqradda kore.

**Qod. 7**
**Iqtisaaska cayiman**

1. Guddiga Maamulka waa hay'adda wax u go'aamisa Wakaaladda. Iyadu waxay go'aan ka gaartaa wax kasta ee danta guud iyo maadda kasta ee Guddoomiyuhu u soo bandhigo. Wuxuu diyaariyaa miisaaniyadda sanadlaha, xisaabaadka faa'iidada iyo khasaaraha iyo tirakoobka guud ee qalabka/alaabada Wakaaladda. Wuxuu oggolaadaa arrimaha maamulka aan caadiga ahayn ee lagu sheegay xeerka.
2. Guddoomiyaha E.N.C.E. waa wakiilka guud ee Wakaaladda. Wuxuu isugu yeeraa oo guddoomiyaa Golaha Maamulka, isagoo soo hordhigaya hawl-maalmeedka. Haddii ay jirto xaalad baahi deg-degga, wuxuu qaadi karaa tallaabooyin ku-meelgaara oo ka mida awoodda Guddiga Maamulka marka uu Agaasimaha Guud soo jeediyo, iyo oggolaashaha Guddiga Ilaalinta isagoo Golaha horkeenaya fadhiga ugu horreya ee ku xiga. Haddii la waayo, uu maqanyahay ama ay jirto wax ka reebaya, waxaa baddalayaa Agaasimaha Guud.
3. Agaasimaha Guud waa xubinta fulinta Wakaaladda. Wuxuu si toosa u xilsaaranyahay maamulka caadiga iyo tallaabooyinka lagu xusay xeerka. Waa madaxa shaqaalaha; awooddaas a wuxuu shaqaaleysiiyaa ama ruqseeyaa shaqaalaha Wakaaladda, marka uu dhagaysto talada Golaha Maamulka wixii la xariira tallaabooyinka xeerku tilmamayo. Haddii la waayo, uu maqanyahay ama ay jirto wax ka reebaya, waxaa baddalaya La-taliye ama sarkaalka xil haya oo uu isagu magacaabo.
4. Guddiga Hantidhowrka waa hay'adda baarista gudaha ee Wakaaladda. Waxay eegaan miisaaniyadda, xisaabta fa'iidada iyo qasaaraha iyo tirakoobka alaabta ay soo qoreen Golaha Maamulka; waxay kalo hubiyaan saxnaanta iyo sida wax loo qaabeeyay ilbaadinta warbixinta qoraalka, ee ku socota Golaha Ilaalinta. Markasta waxay iqtiyaar u leeyihiin in ay ku sameeyaan ilbaadin buugagga iyo maaraynta Wakaaladda.

**Qod. 8**
**Xaaladda sharciyeed ee saraakiisha**

1. Jagooyinka Guddoomiyaha, Agaasimaha Guud, La-taliyeyaasha, Hantidhowrada iyo sarkaal kasta ee xil masuuliyadeed haya waa in loo dhiibaa dad ilbaxa oo awoodi kara, lagu kalsoonyahay isla markaasna xilkas ah, u diyaarsan, waaya-aragnimana u leh.
2. Jagooyinka la soo sheegay lama jaan qaadi karaan hawlaha Garsooraha, iyo sidoo kale in ay galaan hawlo ganacsi, warshadayn iyo mid maaliyadeed. Mushaarka jagooyinkaas la xariira

Gudoomiyaha iyo agaasimaha Guud waxaa lagu soo saaraya dekereto Warshadaha iyo Ganacsiga marka uu dhagaysto talada Golaha Wasiirrada.

**Qod. 9**
**Miisaaniyadda**

1. Afar bilood gudahood hawlkasta oo leh ulajeeddo maaliyadeed, Golaha Maamulku wuxuu ka diyaarinayaa miisaaniyad, iyo xisaabinta faa'iiidada iyo khasaaraha iyo tirakoobka guud ee agabka, waxaana eegaya Guddiga Hantidhiwrka, kadibna waxaa la horgeynayaa Guddiga Ilaalinta si ay u oggolaadan, iyadoo uu wehliyo warbixinta Guddiga Hatidhowrka iyo lifaaqyada.
2. Miisaaniyadda ay oggolaadeen Guddiga Ilaalinta waa la faafinaya iyadoo kharashka ay Wakaaladdu bixinayso.
3. Faa'iidada saafida ee adeegga, marka laga jaro qiimaha loogu talagalay lacagta keydka, waxaa lagu warejinayaa Dawladda.

**Qod. 10**
**Guddiga Ilaalinta**

1. Ilaalinta sare ee lagu samaynayo maaraynta Wakaaladda, iyo oggolaashaha miisaniyadda, waxaa u xilsaaraan Guddiga Ilaalinta oo ka kooban Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, Hantidhowrka Guud iyo saddex xubnood oo Wasiirku magacaabo.
2. Guddiga Ilaalintu waa in ay wax kaga weydiiyaan Guddoomiyaha iyo Agaasimaha Guud arrimaha maamulka aan caadiga ahayn ee la xariira hawlgallada maaliyadeed ee wax ku-oolka ah ee xaaladaha Xeerku tilmaamayo.Talada Guddigu waa mid la raacayo.

**Qod. 11**
**Maaraynta guddiga iyo kala dirista**

1. Marka ay noqoto lagama marmaan, Guddiga Ilaalinta wuxu talo ku soo jeedin karaa, in uu kala doorto;
   a) in si ku meelgaara loo xilsaaro maareynta Wakaaladda Maamule Sare ee Guddi Gara ah;
   b) in la kala diro iyo la geliyo Wakaaladda xaq-gudid (liquidazione) iyadoo la magacaabayo Guddiga xaq-gudidda.
2. labada arrimoodba, qaraarka waxaa lagu meelmarinayaa dekereeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda, marka uu helo tala soo jeedinta Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga, oo dhageystay talada Golaha Wasiiradala.

**Qod. 12**
**Weecinta hantida**

Hantida saafiga ka temid xaq-gudidda Wakaaladda waxaa la siinayaa Dawladda.

**Qod. 13**
**Meeqaamka**

1. Meeqaamka Wakaaladda waxaa lagu meelmarinayaa dekereeto Madaxweynaha Jamhuuriyadda kadib marka uu talo ku soo jeediyo Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga isla markaana uu dhagaysto Golaha Wasiirada.
2. Wixii wax ka baddal dambe ee Xeerka waxaa lagu meelmarinayaa isla habka horay loogu meelmariyay Golaha Maamulka.

**Qod. 14**
**Dhaqangalka**

Xeerkanu wuxuu dhaqangalayaa maalinta ku xigta marka lagu faafiyo Faafinta Rasmiga.

Xeerkaan waxaa lagu daraya Uruurinta Rasmiha ee Xeerarka waxaana lagu faafinayaa faafinta Rasmiga, cidkastana waxaa ku waajiba in ay u ilaaliso ka Xeer ahaanka Jamhuuriyadda.

Taariikhda, Muqdisho 12 Juunyo 1962

**Aden Abdulle Osman**

*Wasiirka Koobaad*
Abdirashid Ali Sherrmaarke.

*Wasiirka Maaliyadda*
Abdulcadir Mohamed Adan

*Wasiirka Warshadaha iyo Ganacsiga "ku sime"*
Abdirashid Ali Sherrmaarke